## Qodobka 53aad
## AWOODA TALIYAHA EE CIQAABTA LA XIDHIIDHA.

Taliyuhu wuxuu awoodaa in uu kordhiyo, ama wax ku daro, ama wax ka bedelo,ama uu wax ka cafiyo ciqaab kasta oo uu amray Sarkaalka Madaxda ahi ama Sarkaalka lagu ogolaaday sida ku xusan qodobada 50,51, iyo 52.
Marka laga reebo arintan ma jirto cid kale oo wax ka bedeli kartaa, ciqaabta uu amrey Sarkaalku Su'aalaha weydiiyey Maxbuuska, sidaas oo kale ciqaab lama kordhin karo haddii aan la dhegeysan Maxbuuska.

## Qodobka 54aad
## CIQAABTA CUNTADA.

1) Laguma samayn karo Maxbuus ciqaab cunto haddii aan marka hore la cadayn in Maxbuuska Caafimaadkiisu wanaagsan yahay, Dhaqtarkuna cadayn samayn.
2) Ciqaabta Cuntada waa in aanay la socon shaqo, waana in aanay ka badnayn ilaa 5 Cisho oo waqti u dhexeeyo ama kala goooni gooni ah.

## Qodobka 55aad
## MARKA LOO GUDBIYO DEMBI CULUS EE XABSIGA LAGA GALO MAXKAMADAHA.

1) Taliyaha ama Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu amri karaa in uu Maxkamada awooda u leh u gudbiyo eedaynta Maxbuuska loo haysto Dambiga culus ee Xabsiga uu ka galay. Haddii Maxbuuska dambiga lagu helo waxa la xukumayaa ilaa (6 Bilood) haddii aanu dambigu aad u cuslayn.
2) Maxbuusna lagu Ciqaabi maayo dambi hore loogu Ciqaabay.

## Qodobka 56aad
## REEBIDA EEDAYNTA XUBINTA.

Laguma eedayn karo Xubin, dacwo madani ah ama ciqaab ah isaga oo fulinaaya sharcigan, Xeernidaamiyaha & Amaradda Madaxda.

## QAYBTA LIXAAD.
## XABSI DHIMIDA AMA SAAMAXAADA.
## Qodobka 57aad
## SAAMIXIDA XADHIGA.

1) Maxaabiista Xadhiga ku Xukuman ee qabata shaqo, dhaqan kooduna wanaagsan yahay waxaa Xadhiga laga dhimayaa Afar meeloodaw Meel Xadhigii lagu Xukumay, Xadhig dhimidaas waxaa shardi u ah inuu Maxbuusku dhamaysto Sadex Meeloodaw laba Meelood xadhigii uu ku Xukunaa;
2) Maxaabiista Xadhiga ku Xukuman Taariikhda Sharcigani dhaqan galo waa loo Xisaabinayaa xadhig dhimista Xadhigii ay Xidhnaayeen, Laakiin Maxbuusna laga sii dayn maayo intii uuna dhaqan gelin Sharcigani.
3) Iyada oo la raacaayo soo jeedinta & Taladda Wasiirka, Madax-waynuhu wuxuu Xadhiga ka dhimi karaa Maxbuus, Sababo Awgood;
4) Marka uu dhaqan galo Sharcigani, Maxbuuska la soo xidho oo dhamaysta Xadhigii lagu Xukumay isaga oo lumiyey Xadhig dhimistiisii, wuxuu xaq u yeelanayaa in Lacag loogu bedelo Xadhig dhimistiisii ka luntay;

5) Maxbuuska ku lumiya Xadhig dhimistii arimo la Xidhiidha Ciqaabta Dembiyadda Xabsiga laga galo, ma yeelanaayo in Lacag loogu bedelo waxaa la mid ah:-
   A) Haduu Cisbitaal ugu jiray si Canaad ah ama arimo uu sabab u yahay.
   B) Haddii uu ku jiray sheelo Ciqaab darteed.

6) Taliyuhu wuxuu awood u leeyahay in uu dib u soo Celiyo dhamaan ama qaybo ka mid ah Xadhig dhimista.

**ART:58 <u>WARBIXIN XILIYEEDKA GAARKA AH.</u>**

Taliyuhu wuxuu warbixin u qorayaa Wasiirka isaga oo sii marinaaya xeer-Ilaaliyaha Guud Afartii sanaba, Iyada oo uu ka Warbixinaayo Maxaabiista ku Xabsi daa'im & kuwa xabsiga ku jiray in ka badan Todoba Sanadood, iyadoo lagu qoraayo Warbixinta fooman gaar ah.

Wasiirku wuxuu dalbi karaa mar kasta in Warbixino laga siiyo arimo gaar ah.

## <u>QAYBTA TODOBAAD</u>.
## <u>SIDAYNTA & TAAKULAYNTA MAXAABIISTA</u>.

### <u>Qodobka 59aad</u>
### <u>MASUULIYADA SIIDAYNTA EE SARKAALKA MADAXDA AH</u>.

1) Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu masuul ka noqon doonaa inuu daayo Maxaabiista isla marka uu ka dhamaado Xadhiga lagu Xukumay;
2) Lagama sii daynaayo Xabsiga Maxbuus Bukaan ah, oo ku jira Xaalad Daawayn oo dhakhtarku la socdo, hadii aan Maxbuusku sii dayn codsanin oo dhakhtarku ogolaan, iyada oo aan wax khatar ahi uga imanayn Bulshadda Caafimaadka Maxbuuska.
3) Maxaabiista sii daynta xaq u leh, waxaa la sii daynayaa Maalinta la sii daynaayo galin keeda hore, Laakiin hadii Maalinta sii dayntu ku beeganto Jimce ama Ciid, waxaa Maxbuuska la siidaynayaa maalinta ku xigta gelinkeeda hore.
4) Haddii ay suurta gal tahay, Maxaabiista waxaa laga sii daynayaa Meesha Xabsigu ku yaalo.

### <u>Qodobka 60aad</u>
### <u>TAAKULAYNTA MAXAABIISTA LA SIIDAYNAAYO.</u>

1) Maxbuus kasta oo ku xukuman wakhti, dheer marka sii dayntiisa ay ka hadho laba bilood waa in Macaawino loo way diiyaa Ururka Taakulaynta Maxaabiista, haddii Taakulayn la siinaayo.
2) Haddii Maxbuuska la sii daynaayo uu wax ka qabo Maskaxda ama Jidhka, waxaa xil ama masuuliyad gaar ahi ka saarantahay Sarkaalka Madaxda ah in uu taakuleeyo Maxbuuska, si uu u geeyo Gurigiisii si nabad ah;
3) Maxaabiista la sii daayey inta ay sugayaan in guryahoodii la geeyo ama ay sugayaan fudud-daynta arintaas la xidhiidha, jiifka & cuntadda Maxaabiistaas la sii daayay waxaa xil ka saaran yahay Sarkaalka Madaxda ah, isaga oo jiifka siinaaya Meel Xabsiga dibada ka ah;

4) Maxaabiista la sii daayay hadii ayna daganayn degmadda Xabsigu ku yaalo kharashka safarka waxaa qaba Dawladda si Maxbuuska loo geeyo Degmadiisii, waxaan Habeen dhax loo siinayaa 200/-SH.SL ah habeenkii ugu badnaan afar habeen inta uu ka gaadhayo Dagmadiisii.

5) Si looga hor tago ku noq-noqoshada dambiyadda Maxaabiista Wakhti dheer ku jirtay xabsiga oo aan helin abaal marin lacageed markii ayna shaqo qabatin caafimaad xumo darteed, ama kuwo aan haysan Saaxiib caawiya, Sarkaalka Madaxda ahi, waa in uu siiyaa Maxbuuska kaalmo dhan 2000/- Ilaa 5000/-SH.SL ah. iyadoo Maxbuusku codsanaayo, Sarkaalka Madaxda ahi haddii uu u arko in ayna Lacagtu ku filayn Maxbuuska, Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu dalab u Samayn karaa Taliyaha oo bixin kara kaalmo dhan 10000/-SH.SL ah ama aan ka badnayn 15000/-SH.SL

## QAYBTA SIDEEDAAD (SIIDEYNTA KU MEEL GAADHKA AH).

### Qodobka 61aad

### OGOLAANSHAHA SIIDAYNTA KU MEEL GAADHKA AH.

Maxbuus ku Xukuman Toban (10) sano ama ka badan, marka loo Xisaabo afar Meelood Sadex meelood, waxaa loo tix gelinayaa ogolaan-shaha sii daynta ku meel gaadhka ah, kuma jiraan Maxaabiista la xidhiidha Xukuumadda Dilka ah, Dambiyadda ka dhanka ah qaranimadda & Maamulka Guud.

## QAYBTA SAGAALAAD.

## BOOQASHADA XABSIGA.

### Qodobka 62aad

### MAGACAABIDA & AWOODAHA LA XIDHIIDHA BOOQASHADA.

1) Wasiirku markii wakhti la joogaba, wuxuu ku magacaabayaa Wareegto Booqdayaasha ku haboon Xabsi kasta.

2) Booqde Xabsi kasta, marka loo eego Xabsiga uu Booqanaayo wuxuu awaadaa:-

A) wuxuu booqan karaa meel kasta oo Xabsiga ka mid ah, wuxuuna eegi karaa meel kasta oo Maxaabiisi ku Xidh-Xidhantahay;

B) Wuxuu kormeeri karaa ama dhadhamin karaa Cuntada ay Maxaabiistu Cunayaan;

C) Wuxuu Sarkaalka Madaxda ah Ogaysiin karaa arin kasta oo shakhsi ah oo la Xidhiidha Maxbuuska, Booqduhu marka uu dhamaysto Booqashadiisa wuxuu warbixin ka qorayaa Buuga Booqdayaasha ee Xabsiga isaga oo ku qoraaya wixii talo & tusaale ah.

## QAYBTA TOBNAAD.

## DAMBIYADA LA XIDHIIDHA XABSIGA & MAXAABIISTA.

### Qodobka 63aad

### WAXYAABO AAN LA OGOLAYN.

Qofkasta oo sameeya isaga oo aan amar ka haysan Madaxda Awooda iska leh:-

B) u dira ama ka soo qaada Maxbuus ku jira Xabsiga ama dibada jooga Warqad ama Documanti, Daawo, Lacag, Dhar, ama wax kasta oo kale.

T) Siiya ama isku daya in uu siiyo Maxbuus marka Maxaabiistu shaqaynayaan, Warqado Docmantis, Buuri, Daawo, Lacag, Dhar & Waxkasta oo kale.

J) Ka qaada ama isku daya in uu ka qaado Xabsi ama u dira Xabsi Warqad ama Documanti.

X) Ama war la socodsiiya Maxbuus, wuxuu galay Dambi waxaana lagu Xukumayaa Xadhig aan ka badnayn ilaa hal Sano ama Ganaax aan ka badnayn SL.Sh. 6000, ama labada oo laysugu daro, hadii aan dambiyadaasi sharci kale lagu sheegin.

Qodobka 64aad

**ALAABTA AMA WAXYAABAHA REEBAN**

1) Qof kasta oo amar La'aan geeya Xabsi alaabta reeban ama amar la'aan ka soo qaada Xabsi wax yaalaha reeban wuxuu gelayaa Dambi, waxaana lagu Xukumayaa lix Bilood ama Ganaax aan kabadnayn 3000/SH.SL ah, ama labada oo laysugu daro haddii aan dambiyadaas sharci kale lagu sheegin.

2) Alaabta ama Waxyaalaha kale ee reeban waxaa loola jeedaa, Alaabta ama waxyaabaha kale ee la Mamnuucay ee lagu qoro qoraal uu Saxeexo Taliyuhu ama Sarkaal ka Madaxda ahi Xabsiga oo ka Wakiil ah Taliyaha,waxaana qoraalkaas ku jira alaabta reeban, qoraalkaas waa in lagu qoraa afka Somalilga, afka Carabiga & afka Ingiriisiga.

Qodobka 65aad

**QABASHADA ALAABTA REEBAN & WIXII LA MID AH.**

Marka laga qaadayo dacwad la Xidhiidha Dambiga ama Axshaxa marin lid ku ah qof kasta, Xubin kasti waa in ay Qabataa Alaabta sida Sharci darada ah lagu helay Xabsiga, Sarkaalka Madaxda ahina wuxuu amri karaa in lagala wareego & in la Ciqaabo qofka lagu eedaynaayo.

Qodobka 66aad

**GELID AMAR LA'AAN.**

1) Qofkasta oo gala Xabsi ama ku Nagaada Aga-gaarka Xabsiga ama Meel ay ka shaqaynayaan Maxaabiisi, isagoon amar haysan Madaxda awooda u leh, wuxuu galayaa Dambi, hadii uu diido markii lagu amro in uu ka tago meeshaa, waxaa Xidhi kara Xubin kasta oo ka mid ah Ciidamada Miletariga & Booliska;

2) Qofkasta oo lagu helo dambiga ku xusan Xarafka aan soo dhaafnay, waxaa lagu ganaaxayaa, Ganaax aan ka badnayn ilaa 300/SH.SL ah ama waxaa la Xidhayaa , Xadhig aan ka badnayn ilaa Sadex Bilood ama waa laysugu darayaa.

Qodobka 67aad

**ALAABTA XABSIGA EE SHARCI LA'AANTA LAGU HAYSTO.**

Qof kasta oo si sharci daro ah ku haysta alaab, Xubin ugu dhiibtay shaqo darteed, ama alaab Xabsi kale leeyahay oo aan Celin ama Qofkii amar la'aan ka gata ama Qaata alaab Xabsi leeyahay Xubin ka tirsan Ciidanka ama Qof kasta oo ku Caawiya ama ku dhiiri geliya Xubin in ay u iibiso ama Qaadato alaabta Xabsiga, waxa uu galayaa Dambi, waaxaana lagu Ganaaxayaa ugu badnaan ilaa 2,800/SH.SL ama waxaa lagu Xukumayaa Xadhig ilaa Lix Bilood (6) ugu badnaan.

Qodobka 68aad

**QAS & KACDOON.**

Qof kasta oo si toos ah ama si dadban u dhiiri geliya ama u abaabula ama u hogaamiya ama talo uga bixiya Qas & kacdoon, lagaga soo hor jeedo nidaamka sharciga ah iyo amaradda xubnaha, oo maxaabiista lagu kicinaayo, wuxuu noqonayaa eedaysane, waxaana lagu xukumayaa xadhiga illaa saddex sano ah (3) sano, haddii aanu dambigu aad u cuslayn.

Qodobka 69aad

Ciqaab Guud.

Qof kasta oo ku xadgudba sharcigan ama xeer-nidaamiyahan wuxuu gelayaa dembi waxaana lagu ganaxayaa ilaa 2000/- Sh.Sl. ah, ama waxaa la xidhayaa ilaa LIX BILOOD oo xadhig ah, haddii aan dembigaas lagu sheegin qodobo gaar ah.

Qodobka 70aad

Awooda sharcigani ku leeyahay, Shuruucda kale;

Marka uu dhaqan galo sharcigani, maxaabiista & dadka kale ee lagu sheegay sharcigan, fal-dambiyeedkooda waxaa lagu dhaqyaa sharcigan, laguna dabiqi maayo shuruuc kale, waxaana la raacayaa ciqaabta ku qoran sharcigan ee uu u gooyay dambiyada isla sharcigan ku xusan, mana jirto qof laba jeer lagu ciqaabo isla hal fal dembiyeed.

**QAYBTA KOW IYO TOBNAAD**

**Qodobadda Dhammaystirka**

**Qodobka 7aad**

Xeer Nidaamiyaha

Madaxweynuhu marka uu dhagaysto talo soo jeedinta Wasiirka, wuxuu degreeto ku soo saari karaa Xeer-nidaamiye uu ku faah-faahinayo sharcigan.

Qodobka 72aad

**Amarada Taagan**

Iyada oo la raacayo sharcigan iyo xeer-nidaamiyaha, taliyuhu wuxuu samayn karaa amaro joogto ah oo la xidhiidha xabsiga iyo maxaabiista.

**Qodobka 73aad**

**Tirtirid**

Waxaa la tirtiray sharci kasta oo ka soo hor jeeda sharcigan.

Qodobka 74aad

Dhaqan galka.

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha SJLand.

REPUBLIC OF SOMALILAND — President

Maxamned Ibraahim Cigaal

**Madaxweynaha JSL**